fact sheet

Siyaadinta ijaarka

Ogeysiin

Laguguma siyadin karo ijaarka mar ka badan lixdii biloodba hal mar. Taasi waxay khusaysaa heshiiska kiraysiga marmarka ah (sida bilbilsha), iyo heshiisyada mudada xadadan ah si loo aqbalo siyaadinta ijaarka mudada xadadan ah. (Haddii uu jiro qoraal ka muuqda heshiiska mudada xadadan ah kaas oo ogolaada in ka badan hal mar oo ijaar kordhin ah mudada 6da bilooda, waxba kama jiraan).

Cidda guriga lihi waa inay ku siisaa 60 berri oo ogeysiin ah marka ijaarka la siyaadinayo waxaana waajiba inay qoraal ku muujiyaan waana inay isticmaalaan foomka ku haboon. Haddii ogeysiiska lagu soo diro boostada, waxaa waajiba inay ogolaadaan laba berri oo ogeysiintu kugu soo gaarto.

Ogeysiintu waxay ahaan kartaa keliya hal ijaar keliya waana inay sheegeysaa hal mar oo ijaar siyaadin ah waana inay kuu sheegtaa xuquuqda aad ku dalban karto Consumer Affairs Victoria inay ku baarto 30 maalmood si ay u baaraan siyaadinta haddii aad u malaynayso inay siyaado tahay.

Haddii ogeysiinta ijaarka la siyaadiyey aanay xaalladahan oo dhan waafaqayn waxba kama jiraan waana in aadan bixin wixii la siyaadiyey. Haddii lagu siiyey ogeysiinta ijaar siyaadinta aadna u malaynayso in aanay waxba ka jirin, la xiriir Tenants Union wixii talo ah.

Ka loolamida siyaadinta ijaarka

Haddii aad u malaynayso in ijaarku badan yahay, waxaad codsan kartaa in baare ka socda Consumer Affairs Victoria yimaado oo baaro guriga aadna qiimayso haddii siyaadintu sax tahay iyo haddii kale. Waa inaad codsataa 30 berri gudahood markaad hesho ogeysiiska ka dib.

Cinwaanka codsigaaga lagu dirayo:
The Director
Consumer Affairs Victoria
GPO Box 123A
Melbourne VIC 3001

Kormeerihu wuxuu eegayaa xaallada guriga, tas-hiilaadka, iyo wax adeeg ah oo guriga la siiyo, wuxuuna is dhinac dhigaa ijaarka laga rabo guriga kuwa la midka ah ee ku yaalla agagaaraha. Inta baaritaanka lagu jiro waa inaad muujisaa wax kasta oo kaalmaynaya dacwadaada in ijaarka la siyaadiyey xad-dhaaf yahay. Taas waxaa ku jiri kara xaallada dayactirida guriga, dhibta goobta, iyo tas-hiilaad kasta ama adeeg kasta oo adiga lagu siiyey halkii laga siin lahaa cidda guriga leh.

Baarida ka dib, baaruhu wuxuu ku siin doonaa warbixin. Haddii warbixintu ay adiga dan kuu tahay laakiin cidda guriga lihi weli ku adkaysanayso siyaadinta ijaarka, waxaad dalab u gudbin kartaa Victorian Civil and Administrative Tribunal si amarka kordhinta aan loo ogolaan. Waa inaad ku dalbataa 30 berri gudahood markaad hesho warbixinta baaritaanka.

Haddii Taraybuunalku go'aamiyo in ijaarku xad-dhaaf yahay, waxay amri karaan in aan ijaarka la siyaadin ama waxyar lagu daro. Waxay kaloo samayn karaan waqti (ilaa 12 bilood) in cidda guriga leh aan loo ogolaan inay siyaadiso ijaarka. Si kasta ha ahaatee Taraybuunalka wuxuu ka dhigayaa amaradaan oo keliya haddii siyaadinta la soo jeediyey ay ka dhigayso ijaarka wax aad u badan halkii ay la mid ahaan lahayd guryaha agagaaraha ku yaal.

Haddii ijaarka la siyaadiyey la meel mariyo ka hor intaan Taraybuunalku arrinta qaadin, waa inaad bixisaa inta la siyaadiyey ilaa Taraybuunalku go'aankiisa sameeyo. Haddii go'aanka la sameeyo uu adiga kuu danaynayo, Taraybuunalku wuxuu amri karaa in cidda guriga lihi u celiyo dhamaan lacagtii la kordhiyey oo aad horay u bixisay.

Hoos u dhigida adeegyada ama tas-hiilaadka

Haddii cidda guriga lihi hoos u dhigto adeeg uun ama tas-hiilaadka la siiyo guriga (sida xirida lawnderiga la wadaago) iyada oo aan hoos loo dhigin ijaarka, waxaad ka codsan kartaa warbixin Consumer Affairs Victoria haddii ay tahay in ijaarka lagaa dhimo. Haddii warbixintu adiga kuu hiilinayso waxaad ka dalban kartaa Taraybuunalka amarka in ijaarka hoos loo dhigay.

Eeg bogga kale...

TENANTS UNION
of Victoria Ltd

La xaajoodka cidda guriga leh

Way mudan tahay in lala xaajoodo cidda guriga leh ama wakiilka ijaarka ee soo jeediyey in la kordhiyo. Waxaa laga yaabaa inay doonayaan in hoos loo dhigo, khaasatan haddii aad muddo isticmaalaysay aadna tahay qof lagu tashan karo ama aad ugu guurayso ijaarka la kordhiyey dartiis.

Haddii aad haysato warbixinta baaraha waxaad kaloo isticmaali kartaa inaad isku daydo inaad waanwaan la samayso cidda guriga leh ama wakiilka si aadan u qaadin talaabada ku xigta oo ah inaad aado Taraybuunalka. Xaqiiji in heshiis kasta oo aad gaarto la qoro oo aad adiga iyo cidda guriga leh ama wakiilkoodu saxiixdaan.

Diidmada bixinta lacagta la kordhiyey

Haddii cidda guriga leh ama wakiilku ku siiyeen ogeysiin aan dhicin aadna diido inaad bixiso, waxay noqonaysaa lacag kugu baaqatay (sida dib u dhac ijaar). Markaad 14 iyo toban ka dib u dhacsan tahay, cidda guriga lihi waxay ku weydiisan karaan inaad guriga ku banayso 14 berri waxayna codsan karaan in guriga lagaa saaro. Waxaa lagu siin karaa fursad ah inaad kayskaaga ugu qadinto Taraybuunalka laakiin waxay u badan tahay in guriga lagaa saaro. Arag xaashida xaqiiqada ***ka Fogaanshaha ka saarida ijaar baaqday dartiis*** ama la xiriir Ururka Kiraystayaasha macluumaad intaas ka badan.

Wixii macluumaad dheeraad ah taleefan u dir Khadka Tallada Ururka Kireystayaasha (Tenants Union Advice Line) ☎ (03) 9416 2577.

fact sheet

Macluumaadkaani waa tuse keliya mana aha inuu bedelo talada sharciga ee mihnadlaha.
Tenants Union of Victoria Ltd ACN 081 348 227 **June 2008** www.tuv.org.au

TENANTS UNION
of Victoria Ltd